WASAARADDA QORSHEYNTA MAALGASHIGA & HORUMARINTA DHAQAALAHA

وزارة التخطيط والاستثمار والتنمية الاقتصادية

MINISTRY OF PLANNING, INVESTMENT AND ECONOMIC DEVELOPMENT

# WARBIXINTA BILLAHA

## JUUN 2025




mop.gov.so

## DULMAR GUUD

Warbixinta Billaha ee Juun 2025 waxay si kooban u soo bandhigaysaa dhacdooyinka, kulammada, iyo howlaha istiraatiijiga ah ee uu hormuudka ka ahaa hogaanka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha. Waxay ka tarjumaysaa dadaallada joogtada ah ee lagu xaqiijinayo fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), iyo horumarinta iskaashiga gudaha iyo dibadda ee lagu taageerayo yoolalka Horumarka Waara (SDGs).

## HORDHAC

Bisha Juun 2025 waxay ahayd bil ay Wasaaraddu xoogga saartay:

o Ka-qaybgalka shirar heer gobol iyo heer caalami ah oo lagu xoojiyay iskaashiga Carabta iyo Bulshada Bariga Afrika.

o Hirgelinta wada-tashiyo muhiim ah oo lala yeeshay hay'adaha caalamiga ah sida WFP iyo Bangiga Horumarinta Afrika.

o Dardargelinta barnaamijyada tababarka iyo tayeynta shaqaalaha, iyadoo mudnaanta la siinayo qorsheynta, kormeerka, qiimeynta iyo u diyaar-garowga mustaqbalka.

o Kobcinta iskaashiga waxbarasho iyo cilmi-baaris iyada oo lala shaqeynayo jaamacadaha dalka.

# FARRIINTA WASIIRKA



*Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxay mar kasta u taagan tahay hagidda himilooyinka horumarineed ee dalka, iyadoo dhiirrigelineysa iskaashi miro dhal ah, hufnaan iyo ka-qaybgal ballaaran oo ay qayb ka yihiin dhammaan daneeyayaasha. Waxaan rajeynayaa in warbixintan billaha ah ay muujinayso guulaha la gaaray iyo sida loo sii wadi karo horumar waara oo waxtar u leh bulshada Soomaaliyeed.*

*– Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene)*
*Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha*

## WASIIRU DOWLAHA QORSHEYNTA OO KULAN GAAR AH LA QAATAY RA'IISUL WASAARAHA LIIBIYA



**30-ka Juun, 2025:-** Intii uu socday Shirka Labaad ee Guddiga Sare ee Machadka Qorsheynta Carabta, Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Axmednuur Sheekh Maxamed, ayaa kulan gaar ah la yeeshay Ra'iisul Wasaaraha Dowladda Liibiya, Mudane Cabdulxamiid Al-Dubeyba. Kulankan muhiimka ah ayaa looga hadlay qodobo ay kamid yihiin: Xoojinta iskaashiga Soomaaliya iyo Liibiya ee dhinacyada socdaalka iyo maaraynta arrimaha tahriibka; Kobcinta karaanka shaqaalaha Soomaaliyeed, gaar ahaan tababarrada iyo barnaamijyada horumarinta xirfadaha ee qaybaha dowliga iyo kuwa gaarka loo leeyahay; Ballaarinta fursadaha deeqaha waxbarasho ee dhalinyarada Soomaaliyeed ee doonaya inay wax ku bartaan gudaha iyo dibadda Liibiya; iyo Kor u qaadidda xiriirka laba geesoodka ah ee labada dal iyo iskaashi miro dhal ah oo Carbeed.

Mudane Axmednuur Sheekh Maxamed ayaa uga mahadceliyay Ra'iisul Wasaaraha iyo dowladda Liibiya soo dhoweynta diirran iyo taageerada joogtada ah ee ay la garab taagan yihiin Soomaaliya. Waxa uu sidoo kale hoosta ka xariiqay sida ay uga go'an tahay dowladda Soomaaliya inay sii xoojiso xiriirka walaaltinimo ee labada dal.

## WASIIRU DOWLAHA OO KA QAYB GALAY SHIRKA GUDDIGA SARE EE MACHADKA QORSHEYNTA CARABTA EE KA DHACAY TRIPOLI



**30-ka Juun 2025:-** Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Axmednuur Sheekh Maxamed ayaa magaalada Tripoli ee dalka Liibiya uga qayb galay Shirka Labaad ee Guddiga Sare ee Machadka Qorsheynta Carabta ee sannadka 2024/2025.

Shirkan oo uu martigeliyay Wasiirka Qorsheynta ee Liibiya, Mudane Maxamed Yuusuf Al-Zaidani, ayaa waxaa kasoo qayb galay wasiirro iyo wufuud ka socday dalalka xubnaha ka ah Jaamacadda Carabta.

Intii uu socday shirka, Wasiiru Dowlaha wuxuu diiradda saaray xoojinta iskaashiga Soomaaliya iyo Liibiya, kobcinta maalgashiga iyo qorsheynta kaabeyaasha dhaqaalaha, iyo sidii loo wadaagi lahaa waayo-aragnimada siyaasadda dhaqaalaha iyo dhiirigellinta maalgashiga.

Mudane Axmednuur Sheekh Maxamed ayaa bogaadiyay martigelinta wanaagsan iyo soo dhoweynta dowladda Liibiya, isaga oo hoosta ka xariiqay sida ay Soomaaliya uga go'an tahay horumarinta iskaashi miro dhal ah oo Carbeed.

## SHIRKA TODOBAADLAHA EE WASAARADDA QORSHEYNTA



**30-ka Juun 2025:-** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shire ayaa guddoomiyay shirka toddobaadlaha ee Wasaaradda, kaas oo ay ka soo qayb galeen Agaasimeyaasha Waaxyaha iyo La-taliyeyaasha.
Shirkan oo qeyb ka ah hab-raaca joogtada ah ee dabagalka iyo qorshe dejinta Wasaaradda ayaa si gaar ah diiradda u saaray falanqeynta waxqabadkii lixdii bilood ee hore ee 2025, gaar ahaan hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) iyo howlaha waaxyaha ee mudnaanta leh.

Agaasimeyaasha Waaxyaha Qorsheynta, Kormeerka & Qiimeynta, Maalgashiga, Maamulka & Maaliyadda, Shaqaalaha iyo Isku-duwidda Deeqaha ayaa soo bandhigay warbixinno faahfaahsan oo ku saabsan heerka fulinta shaqooyinka, caqabadaha horyaalla iyo fursadaha lagu dardar-gelin karo howlaha muhiimka ah ee bilaha Luulyo iyo Agoosto.

Agaasimaha Guud ayaa ku bogaadiyay Agaasimeyaasha iyo dhammaan shaqaalaha Wasaaradda dadaalka iyo wada-shaqeynta ay muujiyeen lixdii bilood ee hore, wuxuuna ku booriyay in la sii xoojiyo wada-tashiga, hufnaanta iyo isku xirnaanta si loo xaqiijiyo guulaha qorshayaasha muhiimka u ah horumarinta dhaqaalaha iyo maalgashiga dalka.


## WADA-TASHIGA QORSHAHA ISTIRAATIIJIYADEED EE SHANTA SANO EE HAY'ADDA CUNTADA ADDUUNKA (WFP)

**29-ka Juun 2025:-** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shire, iyo Agaasimaha Waaxda Qorsheynta, Mudane Muusa Maxamed Cismaan, ayaa magaalada Muqdisho uga qayb galay wada-tashi ku saabsan Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Shanta Sano ee Hay'adda Cuntada Adduunka (WFP).



Wada-tashigan oo ay kasoo qayb galeen masuuliyiin ka tirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya, Hay'adaha Qaramada Midoobay iyo wakiillo ka socday ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa diiradda lagu saaray sidii Qorshaha cusub ee WFP uu si buuxda ula jaanqaadi lahaa Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) iyo mudnaanta horumarineed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

## WASIIRU DOWLAHA QORSHEYNTA OO KA QAYB GALAYA SHIRKA 2AAD EE GUDDIGA SARE EE MACHADKA QORSHEYNTA CARABTA EE KA DHACAYA TRIPOLI, LIIBIYA



**29-ka Juun 2025:-** Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Axmednuur Sheekh Maxamed ayaa si diirran loogu soo dhaweeyay magaalada Tripoli ee dalka Liibiya, isagoo ka qayb galaya Shirka 2aad ee Sannadlaha ah ee Guddiga Sare ee Machadka Qorsheynta Carabta (API).

Soo dhaweynta Wasiiru Dowlaha waxaa hormuud ka ahaa Wasiirka Qorsheynta ee Liibiya, taas oo muujinaysa midnimada iyo iskaashiga Carabta ee dhinacyada qorsheynta iyo horumarinta dhaqaalaha.

Wasaaradda Qorsheynta waxay uga mahadcelinaysaa Dowladda Liibiya soo dhaweynta sharafta leh, waxayna caddeyneysaa sida ay uga go'an tahay Soomaaliya in ay xoojiso iskaashiga gobolka ee qorsheynta iyo dhaqaalaha.

## AGAASIMAHA GUUD OO LA KULMAY AGAASIMAHA WFP EE SOOMAALIYA

**25-ka Juun 2025:-** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH), Mudane Maxamed Shire, oo ay wehliyeen Agaasimeyaasha Waaxyaha Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha, iyo Isku-duwidda Deeqaha, ayaa kulan istiraatiiji ah la yeeshay Agaasimaha WFP ee Soomaaliya, Mudane Elkhadir Daloum.



Kulanka oo ka dhacay xarunta WQM&HDH, ayaa diiradda lagu saaray is-waafajinta Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee WFP iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (2025–2029), wax-ka-qabashada saameynta taban ee ka dhalatay hoos u dhaca deeqaha horumarineed (ODA), iyo xoojinta iskaashiga labada dhinac, gaar ahaan dhinacyada khuseeya SDG 2 (Baabi'inta Gaajada) iyo SDG 17 (Iskaashi istiraatiiji ah).

## WASIIRKA QORSHEYNTA OO KA QEYBGALAY DAAHFURKA RASMIGA AH EE HIIGSIGA QARNI-JIRKA 2060




**23-ka Juun 2025:-** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kala qeyb galay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, Ra'iisul Wasaaraha, Mudane Xamsa Cabdi Barre, iyo marti-sharaf kale oo qiimo leh daahfurka rasmiga ah ee Hiigsiga Qarni-jirka 2060.

Hiigsiga 2060 waa aragtida madaxweynaha ee ku wajahan mustaqbalka fog ee Soomaaliya, waxaana hirgelinteeda lagu xaqiijinayaa iyada oo la marayo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), kaas oo la daahfuray horaantii sanadkan 2025, islamarkaana uu haatan socdo fulintiisa.

Labada qorshe – Hiigsiga 2060 iyo NTP – waxay si buuxda ula jaanqaadayaan Ajandaha 2063 ee Midowga Afrika iyo Yoolalka Horumarka Waara (SDGs), taas oo xaqiijinaysa in himilooyinka qaran ee Soomaaliya ay yihiin kuwo caalamka la jaanqaadaya, si goboleed muhiim u ah, islamarkaana daboolaya baahida shacabka Soomaaliyeed.

## KULAN DIB-U-EEGIS HEER SARE EE HOGGAANKA SARE EE WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA




**21-ka Juun 2025 :-** Hoggaanka Sare ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) ayaa ku yeeshay magaalada Muqdisho kulan banbax ah, kaas oo diiradda lagu saaray dar-dar gelinta howlaha hortabinta u leh wasaaradda iyo dib-u-eegista qorshaheeda sanadlaha ah. Kulanka waxaa wada shir-guddoomiyey Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Xil. Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), iyo Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda, Xil. Maxamed Aadan Maxamed.

Agaasimaha Guud ee WQM&HDH, Mudane Maxamed Shire, Agaasimeyaasha Waaxyaha kala duwan, iyo lataliyeyaasha sare iyo qaar ka mid ah howl-wadeennada muhiimka ah ee wasaaradda ayaa dhammaantood ka qeyb-galay banbaxa, iyaga oo soo jeediyey talooyin iyo afkaar wax-ku-ool ah si loo horumariyo gudashada waajibaadka iyo himilooyinka wasaaradda.

Banbaxa ayaa si gaar ah diiradda loogu saaray arrimo istiraatiiji ah oo ay kamid yihiin: Hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP); Qorshaha Shanta (5) Sano ee Wasaaradda; Isku-dubbaridka deeqaha horumarineed; Xoojinta iyo tayeynta awoodda hay'adaha; Horumarinta iskaashiga iyo xiriirka saaxiibbada horumarineed; Xoojinta Maalgashiga Caalamiga ah; Dhisidda Hannaanka Kormeerka iyo Qiimeynta Qaranka iyo Qorsheynta dhaqaalaha kadib deyn-cafinta (post-HIPC planning).

Ugu dambeyn, banbaxu waxa uu ku soo dhammaaday si guul ah, iyada oo hoosta laga xarriiqay afkaar guud oo lagu dar-dar gelinayo howlaha hortebinta u leh wasaaradda, gaar ahaan fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka iyo xoojinta karaanka wasaaradda.

## WASAARADDA QORSHEYNTA OO XOOJINEYSA ISKAASHIGA JAAMACADAHA SOOMAALIYEED SI LOO DARDARGELIYO HIRGELINTA MANHAJKA QARAN EE QIIMEYNTA




**18-ka Juun 2025:-** Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ahna Guddoomiyaha Guddiga Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta, ayaa kulammo miro-dhal ah la yeeshay hoggaanka Jaamacadda Muqdisho iyo Jaamacadda SIMAD.

Kulammadan ayaa lagu adkeeyay wada-shaqeynta labada dhinac, iyadoo diiradda la saaray horumarinta Manhajka Qaran ee Qiimeynta, tayeynta xirfadlayaasha, iyo kobcinta cilmi-baarista. Labada jaamacadood ayaa door muuqda ka qaatay diyaarinta manhajka, waxayna muujiyeen ka go'naansho ku saabsan hirgelintiisa.

Kulanku wuxuu kusoo dhammaaday is-afgarad guud oo ku aaddan dhismaha nidaam qiimeyn oo hufan, iyadoo la qorsheeyay kulan farsamo oo lagu dardargelinayo hirgelinta manhajka iyo doorka wax-ku-oolka ah ee jaamacaduhu ku yeelan doonaan.

# SOOMAALIYA OO KA QAYBGALAYSA AQOON-ISWEYDAARSI CAALAMI AH OO KU SAABSAN ISTARAATIIJIYADDA HORUMARINTA TAYADA QARANKA



**16-ka Juun 2025:-** Wafdi ka socda Dowladda Federaalka Soomaaliya, oo uu hoggaaminayo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shire ayaa ka qaybgalay aqoon-isweydaarsi heer sare ah oo lagu faafinayo Istaraatiijiyadda Horumarinta Tayada Qaranka (NCDS), oo diiradda saaraysa waddamada Soomaaliya, Koonfurta Suudaan, Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika, iyo Guinea-Bissau.

Aqoon-isweydaarsigan oo ka furmay magaalada Nairobi, waxaa maalgelinayay Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB), waxaana ujeeddadiisu ahayd in la xoojiyo istaraatiijiyado mideysan oo lagu horumarinayo hay'adaha dowliga ah iyo baahinta adeegyada dadweynaha, si gaar ahna loogu taageero dalalka nugul ee ay saameeyeen colaadaha iyo dhibaatooyinka.

Wafdiga Soomaaliya waxa uu ka koobnaa xubno ka kala socday hay'adaha dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, bulshada rayidka iyo jaamacadaha, taasoo muujinaysa sida ay Dowladda Federaalka uga go'an tahay hirgelinta hab wadajir ah oo lagu dardargelinayo dib-u-habeynta maamulka, hufnaanta hay'adaha, iyo horumarinta awoodda qaranka.

Diyaarinta Istaraatiijiyadda Horumarinta Tayada Qaranka ee Soomaaliya waxaa hormuud u ahayd Waaxda Shaqaalaha ee Wasaaradda Qorsheynta, iyadoo si dhow ula shaqeysay Guddiga Qaran ee ka kooban wakiillo ka kala socda dowladda federaalka, dowlad-goboleedyada, bulshada rayidka iyo Jaamacadaha dalka.

Tallaabadan waxay ka tarjumaysaa dadaallada joogtada ah ee Soomaaliya ay ugu jirto dhismaha hay'ado daahfuran, tayo leh, oo si hufan ugu adeega shacabka.

## MAS'UULIYIIN KA KALA TIRSAN HAY'ADAHA DOWLADDA OO DHAMEYSTAY TABABBARKA API EE HORUMARINTA HAY'ADAHA



**14-ka Juun 2025:-** Mas'uuliyiin ka tirsan hay'adaha kala duwan ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa si guul leh u soo dhammeystay laba tababbar oo heer sare ah oo ku saabsanaa "Hay'adaha iyo Horumarka" iyo "Hababka Saadaasha Istiraatiijiga ah iyo Daraasadaha Mustaqbalka". Tababbarradan oo uu soo qabanqaabiyay Machadka Qorsheynta Carabta (Arab Planning Institute – API) ayaa lagu qabtay magaalada Kuwait, intii u dhaxaysay 20 Abriil – 22 May 2025.

Mas'uuliyiinta ka qeybgalay waxaa si rasmi ah u magacaabay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyada oo qayb ka ah dadaallada lagu xoojinayo tayada hay'adaha iyo horumarinta karaanka shaqaalaha dowladda.

Tababbarradu waxay si gaar ah diiradda u saareen kor u qaadista aqoonta iyo xirfadaha la xiriira: Qiimeynta farqiga hay'adaha dowliga ah, Naqshadaynta istiraatijiyado dib-u-habeyn ah oo wax-ku-ool ah iyo Fahamka hababka saadaasha mustaqbalka iyo dhisidda tusaalooyin istiraatiiji ah.

Ujeedada guud waxay ahayd in la xoojiyo ka-qaybgalka hay'adaha dowladda ee qorsheynta muddada fog, si loo hirgeliyo isbeddel wax-ku-ool ah oo waafaqsan Qorshaha Isbeddelka Qaranka ee Soomaaliya (2025–2029).

## WADATASHI QARAN OO KU SAABSAN KA-QAYBGALKA SOOMAALIYA EE QORSHAHA 7-AAD EE HORUMARINTA BULSHADA BARIGA AFRIKA



**12-ka Juun 2025:-** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, iyadoo kaashaneysa Waaxda Bulshada Bariga Afrika ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda, ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay kulan wadatashi qaran oo socday doona muddo laba maalmood ah.

Kulankan ayaa diiradda lagu saaray sidii Soomaaliya ay si buuxda uga qayb qaadan

qaadan lahayd Qorshaha 7-aad ee Horumarinta Bulshada Bariga Afrika (EAC Development Strategy), iyadoo la is barbar dhigayo mudnaanta qaranka iyo himilooyinka istaraatiijiyadeed ee gobolka.

Wadatashiga waxaa ka soo qaybgalay khuburo ka kala socday hay'adaha dowladda Federaalka iyo wakiillo ka socday Xoghaynta Bulshada Bariga Afrika oo dalka u yimid sidii loo dhammaystiri lahaa qorshahaasi muhiimka ah.

Kulankan ayaa ka tarjumaya dadaallada dowladda Federaalka Soomaaliya ee ku aaddan xoojinta ka-qaybgalka firfircoon ee ururrada goboleed iyo ka faa'iidaysiga fursadaha horumarineed ee Bulshada Bariga Afrika.

## WAFTI KA SOCDA WASAARADDA QORSHEYNTA OO KA QAYBGALAY XAFLAD QALIN-JABIN IYO KORMEER SHAQO OO LAGU QIIMEEYAY HIRGELINTA MASHRUUCA SOMALIA JOINT RESILIENCE PROGRAMME (SJRP)

**5-ta Juun 2025:-** Galkacyo, Soomaaliya – Wafti uu hoggaaminayay Agaasimaha Waaxda Qorsheynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Muuse Maxamed Cismaan ayaa ka qeybgalay xafladda qalin-jabinta 50 dhallinyaro ah oo dhammaystay tababar xirfadeed oo ay ku barteen Harqaanka, Korontada, iyo Cunto Karinta.




Dufcaddan qalin-jabisay ayaa ah tii ugu horreysay ee ka faa'iideysata Mashruuca Somalia Joint Resilience Programme (SJRP), oo ay si wadajir ah u hirgelinayaan Hay'adaha Cunnada Adduunka (WFP) iyo Hay'adda UNICEF. Mashruucan ayaa diiradda saaraya u adkaysiga xasaradaha iyadoo la xoojinayo adeegyada muhiimka ah sida Caafimaadka, Waxbarashada, Farsamada Gacanta iyo Shaqo Abuurka.

Intii ay joogeen magaalada Galkacyo, wafdiga ayaa kormeer shaqo ku tagay xarumaha adeegyada mashruuca, iyagoo si gaar ah u eegay sida ay u socdaan adeegyada caafimaadka, tababarrada xirfadeed, iyo barnaamijyada loogu talagalay dhallinyarada si ay u helaan xirfado suuq-gal ah.

Agaasime Muuse Maxamed Cismaan ayaa hoosta ka xarriiqay muhiimadda ay leedahay maalgelinta awood-siinta dhallinyarada, isagoo xusay in SJRP uu yahay tusaale muuqda oo muujinaya sida iskaashi dhow oo dhexmara dowladda iyo hay'adaha caalamiga ah uu u horseedi karo horumar waara.

## WASIIRU DOWLAHA QORSHEYNTA OO LA KULMAY HAY'ADAHA IJMAC IYO SALSABIL



**4-ta Juun 2025:-** Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Axmednur Sheekh Maxamed, oo uu wehliyo Agaasimaha Waaxda Maalgashiga, Mudane Maxamed Dubo ayaa kulan miro-dhal ah la qaatay hay'adaha Ijmac iyo Salsabil oo dalka ka fuliya mashaariic samafal iyo horumarin.

Wasiirka ayaa uga mahadceliyay howlaha ay bulshada u hayaan, isagoo ku dhiirrigeliyay in ay xoogga saaraan mashaariicda horumarineed ee waara si loo gaaro kobac dhaqaale iyo adeegyo waxtar leh.

## GUDDIGA QARAN EE KORMEERKA IYO QIIMAYNTA OO SHIRKIISII 6-AAD KU QABTAY LAASCAANOOD

**26-ka Maajo 2025:-** Shirka 6-aad ee Guddiga Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta ayaa si guul leh uga qabsoomay magaalada Laascaanood, oo martigelisay xubno ka kala socday Dawlad Goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir. Shirka waxaa guddoomiyey Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ahna Guddoomiyaha Guddiga.



Intii uu socday shirka waxaa la falanqeeyay horumarka laga gaaray kormeerka iyo qiimaynta, hirgelinta Siyaasadda Qaran, tayeynta shaqaalaha heer Federaal iyo Goboleed, iyo kormeerka barnaamijyada uu maalgeliyo Bangiga Adduunka. Waxa kale oo lagu adkeeyay muhiimadda diyaarinta warbixinno tayo leh oo lagu cabbiro natiijooyinka Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Shirku wuxuu kusoo dhammaaday go'aammo lagu xoojinayo hufnaanta iyo isla xisaabtanka howlaha dowladda.

### Gunaanad

Warbixinta Billaha ee Juun 2025 waxay muujinaysaa dadaalka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee ku wajahan hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka, kobcinta iskaashiga gudaha iyo dibadda, iyo dhisidda awoodda hay'adaha si loo gaaro Hiigsiga Qarni-jirka 2060 iyo yoolalka horumar waara.

Waxaa mahad leh dhammaan mas'uuliyiinta iyo shaqaalaha ka qeyb qaatay fulinta howlaha muhiimka ah ee ku xusan warbixintan.


WASAARADDA QORSHEYNTA
وزارة التخطيط
MINISTRY OF PLANNING



MoPIED